

Sharciga Shaqada

MAINE
DEPARTMENT OF
LABOR

Bureau of Labor Standards

Sharciyada Sharciga Shaqaalaha ee Gobalka Maine ayaa difaac siinaaya dadka ka shaqeeya Maine. Waaxda Shaqaalaha ee Maine ayaa maamusha sharciyada, taasoo dhammaan loo shaqeeyaasha ay qasab tahay inay raacaan. Wakiillada waaxda ayaa kormeer ku samaynaaya goobaha shaqada si loo xaqiijiyo ku dhaqanka. Ganaaxyo iyo ciqaabo ayaa la saari karaa loo shaqeeyaasha aan u hogaansamin sharciga.

Boorkaan wuxuu qeexayaa qaar kamid ah qaybaha muhiimka ah ee sharciyada. Nuqulka sharciyada saxda ah ama turjumaada rasmiga ah ayaa laga qaadan karaa Waaxda Shaqaalaha, Laanta Sharciyada Shaqaalaha, adoo wacaaya 207-623-7900. (Sharciyada ayaa sidoo kale ku jira webseedka Laanta.)



Sharciga Maine (Farqada 26 M.R.S.A. § 42-B) ayaa qasab ka dhigaaya in loo shaqeeye kasta uu boorkaan ku dhajiyo goobta shaqada gaar ahaan meel ay shaqaaluhu si fiican u arki karaan.

Boorkaan ayaa looga heli karaa barta oonleena ah si bilaash ah waxaana laga samaysan karaa nuqul: <https://www.maine.gov/labor/posters/>

Waqtiga Lacag Bixinta

Shaqaalaha waa in mushaarka buuxa la siiyaa ugu yaraan 16 kii maalmood kasta. Shaqaalaha waa in loo sheegaa hoos u dhigid kasta oo lagu sameeyo mushaaraadka ama gunnada ugu yaraan hal maalin kahor intaan isbadalka la samayn.

Bixinta Mushaaraadka

Shaqaaale ka tagaya shaqada waa in si buuxda loo siiyaa mushaharkiisa wax aan ka dambayn maalinta bixinta mushaharka shaqaalaha ee xigta. Tan waxa kale oo ku jiri kara bixinta mushaharka fasaxa ee isku ururay ee la siin iyo/ama Fasaxa Lacageed ee la Kasbaday.

Heshiis aan Cadaalad ahayn

Loo shaqeeyaashu qasab ugama dhigi karaan shaqaale inuu bixiyo khasaaroyinka soo gaaray sida agabka badeecada ee jabay, jeegaga lacagta ee halaabay, ama lacag ay bixin waayeen macaamiishu, walaa lacagta yunifoomka gaarka ah ama agabka qaarkood ee ganacsiga.

Fasaxyada Nasiinada

Inta badan shaqaalaha waa in la siyaa 30 daqiiqo oo xariir ah oo ay mushaar ku qaataan ama bilaash ah oo ay ku nastaan kadib 6 saacadood oo shaqo ah.

Hooyooyinka ilmaha nuujinaaya waa in la siiyaa waqtiga bareega aysan mushaarka ku helayn ama loo fasaxayaa inay xili hore adeegsadaan bareegooda mushaarka leh ama cuntada si ay caanaha iskaga lisaan. Loo shaqeeyuhu waa inuu sameeyaa dedaalka macquulka ah si uu u siiyo qol nadiif ah ama goob, aan ahayn musqusha, oo caanaha ay iskaga lisi karto hooyadu.

Fasaxa Caafimaadka ee Qoyska

Shaqaaale shaqaynaayay 12 billood ee lasoo dhaafay joogayna goobta shaqada oo leh 15 shaqaale ama ka badan ayaa la fasaxi karaa 10 asbuuc oo uu mushaar ku helaayo ama uusan ku helayn 2 dii sanaba mar sababaha soo socda awgood:

- ◆ Dhalashada ama korinta ilmo ama ilmaha lamaane caadi ah;
- ◆ Xaalad caafimaad oo daran oo haysata shaqaalaha ama xubin qoyskiisa dhow kamid ah, uuna ku jiro lamaane jacayl; ilmaha lamaanaha, ilmaha uu awoowaha u yahay, ilmaha uu awoowaha u yahay lamaanuhu.
- ◆ Ku deeqista Xubinta jirka;
- ◆ Geerida ama xaalada caafimaad ee daran ee xaaska shaqaalaha, lamaanaha, waalidka ama ilmaha haddii ay dhacdo inta xaaska, lamaanaha, waalidka ama ilmuhu uu shaqada ku jiray;
- ◆ Xaalad caafimaad oo daran ama geerida walaalkiis ay wadaagaan qorshe nolol ama dhaqaale oo wadajir ah shaqaalaha.

(Fasaxa caafimaadka ee Qoyska ee Federaalku waa gaar, wac 866-487-9243 si aad macluumaad dheeri ah uhesho.)

Fasaxa Dhibaneyaasha Rabshada, Weerarka, Duulaanka Galmada ama Raadgalka

Waa in loo ogolaadaa markuu codsado haddii shaqaalaha (ama ilmo, waalid ama xaaska shaqaaluhu) uu yahay dhibanaha rabshad, weerar, duulaan galmo ama raadgal ama fal kale oo mutaysan kara amarka difaaca sida ku cad Farqada 19-A M.R.S.A., c. 101 shaqaaluhuna uu u baahan yahay waqti uu:

- ◆ Ugu diyaar garoobo uuna uga qaybaglo dacwadaha maxkamada; ama
- ◆ Uu ku qaato daawayn caafimaad; ama
- ◆ Uu ku helo adeegyada uu u baahan yahay si loo daaweeyo dhibaata.

Fasaxa Daryeelka Qoyska

Haddii xeerka loo shaqeeyuhu uu bixinaayo waqtiga fasaxa mushaarka leh, shaqaalaha waa in la siiyaa inuu adeegsado illaa 40 saacadood 12 billood gudahood si uu u daryeelo qofka qoyskiisa kamid ah oo xanuunsan.

Fasaxa Mushaarka Lagu Qaato

Loo shaqeeye ay u shaqeeyaan in ka badan 10 shaqaale laguna shaqeeyo jadwalka caadiga ah ee shaqada in ka badan 120 maalmood oo ka mid ah samadka waa inuu siiyaa shaqaale kasta inuu helo fasax mushaar leh ayadoo la raacaayo mushaarka aasaasiga ah ee shaqaalaha. Shaqaale ayaa xaq u leh inuu helo hal saac oo uu mushaar ku helaayo uuna bixinaayo hal loo shaqeeye 40 saacadood kasta oo uu shaqeeyaba, ilaa 40 saacadood kadib markuu shaqaynaayay hal sano. Kaydinta waqtiga fasaxa ayaa ka bilaabanaysa marka shaqadu bilaabato, laakiin loo shaqeeyaha qasab kuma ahan inuu ogolaado adeegsiga fasaxa kahor intaan shaqaaluhu u shaqayn loo shaqeeyaha 120 maalmood inta lagu jiro muddo hal sano ah.

Canshuur dhaafka Dakhliga Kusoo gala

Shaqaalaha ayaa u qalmi kara caawimaada canshuurta dakhliga soo gala ee federaalka iyo gobalka. Shaqaalaha ayaa codsan kara caawimaada canshuurta ee lagu bixiyo celinta canshuurta dakhliga ee shaqaalaha.

Fiiro gaar ah: Shaqaalaha reer Maine ayaa sidoo kale difaac ka helaaya Sharciga Heerarka Caddaalada Shaqaalaha ee Federaalka. Si aad u hesho xog dheeraad ah, la xariir Xafiiska Mushaarka iyo Saacada ee Waaxda Shaqaalaha Maraykanka ood ka wacayso 866-487-9243.

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah, la xariir:

Maine Department of Labor
Bureau of Labor Standards
45 State House Station
Augusta, Maine 04333-0045
oo ku yaala: 45 Commerce Drive
Taleefanka: 207-623-7900

Isticmaalayaasha TTY ha wacaan Maine Relay 711.
Website: www.maine.gov/labor/bls | Email: bls.mdol@maine.gov

Shaqada Ikhtiyaarka Qofka ah —Sida uu qabo sharciga Maine, shaqaalaha ikhtiyaariga ah ayaa shaqada looga saari karaa sabab kasta oo uusan si gaar ah u mamnuucin sharcigu. Inta badan, waxaa tahay shaqaale ikhtiyaari ah illaa inuu ku difaacaayo maah ee heshiis wadareed ama heshiis nooc kale ah oo xadidaadaya shaqo ka cayrintaada. Haddii aad su'aalo ka qabto shaqada ikhtiyaariga ah, la xariir waaxda shaqaalaha ama Laanta Heerarka Shaqaalaha.